

Fursadaha Kale

Dugsiyada SDUSD waxay ardeyda dhigata fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad u fidisaa barnaamijyo xiiso leh oo dheeraad ah, si baahida ilmaha loo daboolo. Dugsiyadan soo socad waa kuwo ikhtiyaariyan la dooran karo, waxaana ka mid ah in guriga waxbarashadda lagu qaato (home study), dugsiyada dhexe, iyo barnaamijyada yaryar ee dugsiyada sare. Waxaad soo dalbataa barnaamijyadan adiga oo isticmaaleya arjiga Doorashada Dugsiyada oo ku yaal buuggan-warbixineed xagiisa dambe, haddii aysan ku xusaneyn xaga hoose (fiiri Mt. Everst Academy iyo San Diego Early/Middle College oo loogu talagalay shuruudaha diiwangelinta). Diiwaangelinta waxaa lagu soo dalban karaa barnaamijka Diiwaangelinta Furan (fiiri bogga 23aad), wax gaadiid ahna lama bixineyo.

Dhismaha Waxbarashadda Dugsiyada Sare 9-12 ee Crawford

4191 Colts Way, San Diego, CA 92115 • (619) 583-2500

Dhismaha Dugsiyada Sare ee Crawford waxaa ku yaala afar dugsi oo yar yar, oo madax bannaan, mid kasta ahmiyada saara shaqooyinka xirfadaha lagu shaqeyo oo gaar ah:

Akademiyada Waxbarashadda Hindisaha iyo Naqshadeynta

(IDEA) http://www.sandi.net/hsrenewal/sm_schools_idea.html

Gaadidka iyo siibabka inta u dhexeysa taas oo laga wado farsamada casriga ah ee weyn iyo waxyaabaha yar yar, ee ay dadku sameeyaan waxyaabo iyo naqshado cusub si ay noloshu ugu sahlanaato. Akademiyada Waxbarashadda Hindisaha iyo Naqshadeynta (IDEA) wuxuu ardeyda u fidiyaa fursadaha ay ku baraneyaan injineerimada iyo baabuurta sameyntooda. Shahhaadada NATEF loo yeqaano waxay ardeyda u oggolaaneysaa inay dhibcaha kullejada lagu galeyo ku helaan, isla mar ahaantaasna, xaq u yeeshaan inay heerarka bilowga ah ee shaqada dalka lagu galeyo helaan. Barnaamijka injinerinka waxaa aqoonsigiisa bixiyey Project Lead The Way, oo ay kafaalo-qaadey Jaamacadda San Diego State University.

Dugsiyada Caafimaadka Jaaliyada iyo Daaweynta (CHAMPS)

http://www.sandi.net/hsrenewal/sm_schools_champs.html

CHAMPS waxaa weeyaan inay ardeydu qalin jebiyaan, iyaga oo isku filan oo leh tababarka ay noloshu uga baahan yihiin, taas oo ay ku baraneyaan manhajka caafimaadka ku saabsan, waxaana ka mid ah Mediversity, cilmiga dhismaha jidhka iyo barashadda qaabka dhismaha jidhka iyo sida ay unugyadu u shaqeeyaan iyo Cilmiga Baayolajiga. Ardeyda dugsiyada CHAMPS waxay iska xil saaraan noloshooda mustaqbalka ah, waxayna iska diiwaangeliyaan AVID iyo Koorsooyinka Sare (AP). Waxaan ardeydeyada u diyaarinaa inay noqdaan kuwo heellan, hoggaamiyaal jaaliyada ka ah, inta ay u diyaargarobayaan inay kullejada galaan.

Dugsiyada Sharciga iyo Ganacsiga

http://www.sandi.net/hsrenewal/sm_schools_craw_law.html

The focus of the School of Law & Business is to prepare all students to qualify for a four-year college/university through the lens of business, legal and law enforcement opportunities and careers. Real-world experiences include field trips, job shadows, internships and college tours. Teachers and students are empowered to work in partnership with parents and the legal, law enforcement and business community. Meaningful learning opportunities connect present experiences to future goals and provide realistic, rigorous curriculum and career exploration.

Dugsiyada Warbaahinta iyo Muuqaalka Farshaxanka (MVAS)

http://www.sandi.net/hsrenewal/sm_schools_craw_arts.html

Ku soo dhawaada dunidda fiidiyowga, farshaxanka muuqaalka, bog Internet (web) iyo naqshadeynta giraafyada. MVAS waxay ardeyda u fidiyaa jawui waxbarasho oo wacan, kaas oo hindisaha farshaxanka awood weyn saareya, isla mar ahaantaasna, manhajka waxbarashadda si fiican loogu dhigeyo. Ardeydu waxay waayo-aragnimada shaqada ka helayaan safarada dugsiyada bannaanka looga baxayo, tababarada iyo ka shaqeynta xarumaha shaqada. Qalabka khaaska ah ee dugsiyada MVAS laga heli karo waxaa ka mid ah sheybaadhka koombiyuutarada oo wacan, qalab heer sare ah oo dhammeystiran iyo istuudiyaha farshaxankla ee bannaanka. Ardeydu waxay kale oo fursad u helayaan inay ka qeyb galaan dhacdooyinka dhismaha dugsiyada lagu qabaneyo, isboortiga iyo naadiyada.

Dugsiyada Dhexe ee Hindisaha (Innovation 7-8 Middle School)

5095 Arvinels Avenue, San Diego, CA 92117 • (858) 278-5948

<http://www.imiddle.org>

Waxbarashadda Dugsiyada Dhexe ee Hindisaha (Innovation Middle School) wuxuu ahmiyada saaraa maaddooyinka kala ah Saaynis, Farsamada casriga ah, Injineerinka & Xisaabta (STEM). Dugsiyada waxaa la yareeyey tirade ardeyda fasalka, manhaj waxabarsho oo wacan iyo farsamada Casriga ah ee Qarnigan 21aad. Mashaariicda ay ka midka yihiin Podcasts, WebQuests, shir weynayaasha fiidiyowga lagu qabto, soo saarista fiidiyowga, iyo koombiyuutarada gacanta lagu qaato oo ardey kasta la siiyo, khadka Internetka oo macluumaad laga helayo ayey ardeyda iMiddle wx ku bartaan. Ardeyda waxaa la baraa inay masalooyinka xalliyaan, kedibna adeegsadaan farasmada casriga ah si ay u gaadhaan heerarka waxbarasho ee Kaaliforiya u dejiisan. Shaqaalaha kartida wanaagsan leh waxay ku dadaaleyaan inay ardeyda mustaqbalka ka dhigaan kuwo ku wanaagsan saaynis iyo xisaabta.

HADA SOO WAC!

Araajida waa in la soo gudbiya intaa u dhexeysa bilaaha

Noofember 1 deeda ilaa
iyo Febraayo 15 keeda

Dhismaha Waxbarashadda Dugsiga Sare 9-12 ee Lincoln

4777 Imperial Avenue, San Diego, CA 92113 • (619) 266-6500

<http://lincolnhighsd.net/hornets/>

Dhismaha Dugsiga Sare ee **Lincoln** waxaa ku yaala afar dugsi oo yar yar, oo madax bannaan, mid kasta ahmiyada saara shaqooyinka xirfadaha lagu shaqeeyo oo gaar ah:

Xarunta Caddaalada Bulshada (Center for Social Justice 9)

Si loogu sahlo inay waxbarashadda guul ka gaadhaan ardeyda u gudubtey dugsiga sare ,

Lincoln wuxuu abuurey **Xarunta Caddaalada Bulshada**, oo ah dugsi yar oo dhismaha ku dhex yaala, kaas oo loogu talagalay ardeyda soo galeysa fasalka 9aad. Ardeydu waxaa la bareyaa koorsooyin waxbarasho oo loogu diyaarineyo inay kulleejada galaan, taas oo ay xaataa manhajka dawlad-goboleedka wax dhaafsiisan baran karaan. Waxaa kale oo intaas weheliya, macallimiintu waxay ardeyda u gudbin karaan arrimaha la xidhiidha Caddaalada Bulshada (sida caddaalada, nidaamka sharciga, kala duwanaanshaha, u doodista, awood siinta ardeyda, ololeynta, iwm) inta ay waxbarashadda guud la dhiganeyo

Xarunta Nabadgelyada Dadweynaha (Center for Public Safety 10-12)

Xarunta Nabadgelyada Dadweynaha waxay ardeyda rabta inay bartaan xoojinta sharciga, dabka, badbaadinta iyo ka jawaab-celinta xaaladaha deg degga ah u fidiyaan fursad ay wax kaga bartaan aqoonyahanada takhasuska ku leh arrimahaas. Inkastoo ay xarunta ahmiyada saarto waxbarashadda la xidhiidha siyaabaha xaaladaha deg degga ah looga jawaab celiyo, hadana ardeyda xaruntan wax ka dhigata waxay ka qeyb geli doonaan waxbarashadda manhajka A-G loogu talagalay, kaas oo ay ugu diyaar garoobayaan sidii ay u geli lahaayeen kulleejada afarta sanno ah.

Xarunta Saayniska iyo Injineerinka (Center for Science and Engineering 10-12)

Xarunta Saayniska iyo Injineerinka waxay bixisaa mashriic gacanta wax laga qabaneyo iyo manhajka A-G. Ardeydu waxay si wadajir ah uga wada shaqeeyaan inay baadhaan, oo fahmaan , kedibna saayniska soo horumariyaan. Ardeyda fasalada 10aad-12aad ee xiiseynaysa Injineerinka, Cilmiga sameynta naqshadaha iyo dhismeyaasha, Baayoteknoloji, iyo shaqooyinka xirfadeed ee Caafimaadka la xidhiidha ayaa lagu dhiiri gelineyaa inay soo dalbadaan.

Xarunta Farshaxanka (Center for the Arts 10-12)

Ka sokow koorsooyinka waxbarasho ee loogu diyaar garoobeyo gelitaanka kulleejada, waxay **Xarunta Farshaxanka** bixisaa fursado lagaga qeyb galeyo casharada muuqaalka iyo bandhigyada farsahaxanka. Koorsooyinkaas waxaa ka mid ah qoob-ka-ciyaarka, qasiidooyinka kiristaanka la xidhiidha, masraxiyad, sawirista, riijiyeynta dhoobo-sameynta, warbaahinta iyo naqshadeynta, tiyaatarka farsamada casriga ah, iyo koox muusiko tunta.

Dugsiga soo saara Aqoonyahanada iyo Ciyaartooyda ciyaaraha fudud ee Memorial 6-8

2850 Logan Avenue, San Diego, CA 92113 • (619)231-8581

<http://www.sandi.net/memorialprep/>

Dugsiga Memorial Prep wuxuu bixiyaa barnaamijyo waxbarasho oo muhimada saareya kobcinta jidhka iyo mid bulsho ee ardey kasta. Fasalada 6aad ilaa iyo 8aad waa buundada ay carruurta ku gudbeeyaan dugsiga hoose una gudbeeyaan dugsiga sare waxaana la siineyaa koorso waxbarasho oo jawi wanaagsan leh.

Wuxuu ku yaal dhismo ay dugsiga badan ku yaaliin ee agagaarka deegaanka Memorial, dugsiga wuxuu ahmiyada saara laba rrimood oo kala ah ciyaaraha fudud ee dugsiyada dhex mara iyo waxbarasho wanaagsan, taas oo ay ku jiraan shuruuda ah in heer kasta oo fasal laga rabo inay bartaan luuqaha adduunka mid ka mid ah iyo in muhimada la saaro Luuqadaha Ajinebiga iyo Barashada Koonka (Dunnida) oo loo yeqaano FLAGS. Barnaamijka waxbarashadda waxaa ka mid ah saddex sanno oo ah “barnaamijka guusha” taas oo ay ku jiraan barnaamijka AVID, xirfadaha farsamada casriga ah iyo koombiyuutar wax ku qorista iyo caafimaadka isboortiga.

Akademiya Mt. Everest X-12 (Home Study Program)

4350 Mt. Everest Boulevard, San Diego, CA 92117 • (858) 496-8778

<http://www2.sandi.net/mteverest>

Akabemiya Mt. Everest waa dugsi si wanaagsan loo aqoonsan yahay oo hadana ah dugsi gaar ah una adeegga fasalagda Xanaanada ilaa iyo 12aad. Dugsigannu wuxuu u adeegaa waalidiinta rabta inay ilmahoodu guriga wax ku bartaan, iyaga oo manhajka dawlad-goboleedka u dejisan raacaya. Ardeydaas guriga wax ku baraneysa waxay caawimaad dheeraad ah ka helayaan macallimiin shahaadada macallinimada haysta. Ardeyda waxaa dhibco lagu siineyaa marka ay dhammeystirraan shaqalo dhiibo, waxaana heshiisha Waxbarashadda Madaxa Bannaan wada saxiixaya ardeyga, waalidka iyo macallinka.

Waxyaabaha gaarka ah ee dhismaha dugsiga laga heli karo ee ardeyda caawineya waxaa ka mid ah: sheybaadhka koombiyuutarka casriyeyaan oo leh macluumaad waxbarasho iyo khadka Internetka, sheybaadh saaynis oo si wacan u qalabeysan, xarunta macluumaadka iyo maktabad loogu talagalay ardeyda iyo waalidiinta, cashar sheybaadhka ah oo toddobaad kasta ah iyo koox waxbarashadda laga taageerayo, barnaamijka muusikada X-12aad iyo koorsooyinka Meeleynta Sare. Si aad isaga diiwaangelisid, fadlan si toos ah dugsiga ula xidhiidh.

Dugsiga Waxbarashadda Dunnida ee Culunta Caalamiga ah ee Pacific Beach 6-8

4676 Ingraham Street, San Diego, CA 92109 • (858) 273-9070

<http://pbmiddle.sandi.net/>

Dugsiga Waxbarashadda Dunnida ee Culunta Caalamiga ah ee Pacific Beach (IB) wuxuu ardeyda u diyaariyaa inay bartaan arrimaha koonka (dunnida), taas oo ay ku baraneyaan manhaj mashaariic ay sameynayaan ku salleysan. Dhismaha Guriga oo si dugsi u qaabsan wuxuu wakhti siiyaa wwaxbarashada iyo weliba Luuqada, Farshaxanka, Farsamada casriga ah ee Naqsgshadeynta. Waxyaabaha kale ee dheeraadka ah ee uu bixiyoo waxaa ka mid ah: Makhaayadaha arrimaha Dunnida kaga sheekeysiga, Barnaamijyada GATE iyo Seminar, Isbooriga, Koombiyuutarka qof qof loo adeegsaneyo, Shirweynayaal ay ardeydu hoggaamineyaan, ololeyaasha adeega, abaalmarinada, sameynta fidiyowga iyo shir ku yeelashada fidiyowga.

Kulleejada San Diego ee Bilowga iyo Dhexe 9-12

Dugsiga Sare (San Diego Early/Middle College)

1313 Park Blvd., T-112D, San Diego, CA 92101-4712 • (619) 525-2000

Waxay ku taalaa dhismaha San Diego City College,

Kulleejada San Diego ee Bilowga iyo Dhexe wuxuu u adeegaa

ardeyda rabta inaysan wax u baranin sidii caadiga ahayd ee dugsiga sare. Barnaamijka dugsiga ee bilowga kulleejada wuxuu ardeyda fasalada sagaalad u fidiyaa fursad ay isku diiwaangeliyaan, oolagaga taageero inay dibloomada dugsiga sare qaataan iyo ilaa laba sanno oo waxbarashadda kulleejada ah (taas oo aan qoysaskooda wax lacag ah ugu fadhiyin) muddo shan sanno ah ama in ka yar. Barnaamijka dugsiga ee dhexe kulleejada wuxuu u adeegaa ardeyda fasalada 11aad iyo 12aad ee waxbarashadda ku wanaagsan. Waxaa intaas dheer in marka ay ardeydu buuxineyaan arjiga Doorashada Dugsiga waa inay buuxiyaan arjiga Kulleejada

San Diego ee Bilowga iyo Dhexe. Marka shaqaalaha dugsiga ay fiiriyaan arjiyada iyo qoraalka minguursan (transcript) waxay ardeyda la yeelanayaan wareysi, kedibna waxay go'aan ka gaadheyaan inuu dugsigannu yahay midka u wangaasna iyo in kale.

Dugsiga Sare ee Shaqooyinka Xirfadaha iyo Farsamada Gacanta ee San Diego (San Diego Metropolitan Regional Career and Technical High School 9-12)

7250 Mesa College Drive, Rm. F258, San Diego, CA 92111
(619) 388-2299

San Diego Met waa dugsiga sare ee kulleejada loogu diyaargaroobeyo oo ku yaal dhismaha Kulleejada Jaaliyada ee Mesa. Ujeeddada San Diego Met waxaa weeyaan in ardey kasta mar loo diyariyo inuu kulleejada galo, taas oo lagu sameynayo goobta shaqada iyada oo hawlgalka waalidka iyo jaaliyada waxbarasho wacan lagu siineyo. Ardeydu waxay fursad u helaayaan ay ku qalin jebiyaan oo la guddoonsiiyo shahaadada dugsiga sare, waayo-aragnimada shaqada iyo qiyaastii 50 dhibacaha kulleejada ah. Barnaamijka waxbarashadda Met wuxuu buuxineyaa shuruudaha lagu qalin jebineyo iyo shuruudaha koorsada (A-G) si loogu oggolaado jaamacadaha UC iyo CSU.

Gelitaanka Dugsiyada degmada Dhexdeeda ku yaala

Ardeyda deggan meel degmada ka baxsan oo rabta inay soo galaan dugsiyada San Diego Unified waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha Fasaxa Gelitaanka Dugsiyada Degmada dhexdeeda ah iyo ardeyda San Diego deggan ee rabta inay degmo kale dugsi ka galaan.

- Ardeyda deggan San Diego waxay warqada fasaxa ah ka heli karaan Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah, Education Center, Annex 7-B ama soo wac (619) 725-5672.
- Ardeyda meel degmada ka baxsan deggan waa inay helaan warqadaas fasaxa ah, kedibna dugsiga deegaanka uu deggan yahay ee degmada ka bilaabaa habka isdiiwaangelinta ee loo baahan yahay.
- Fasaxa degmada dhexdeeda ah barnaamijyada Diiwaangelinta Furan iyo Magnet waa laga oggol yahay. Taas laguma dabaqi karo VEEP iyo PISC.
- Arjiga Doorashada Dugsiga ee loogu talagalay Diiwaangelinta Furan iyo Magnet ayaa dhammaan ardeyda deggan meel degmada ka baxsan looga baahan yahay.
- Oggolaanshaha Fasaxa Gelitaanka Dugsiyada Degmada dhexdeeda ah macnaheedu waxaa weeyaan inuu ardeygu haysto sabab ansax ah oo uu ku galo dugsiga degmada. Hase ahaatee, ma jiro wax damaanoqaad ah oo loo siineyo in laga diiwaangelinayo dugsi gaar ah.

Fasaxa Gelitaanka Dugsiyada Degmada Dhexdooda ah waa in sannad walba la cusbooneysiyyaa. Ardeyda deggan meel degmada ka baxsan si ay dugsiga u sii dhigtaan uma baahna inay arjiga Doorashada Dugsiga sannad kasta soo buuxiyaan, laakiin waa in sannad kasta la cusbooneysiyyaa fasaxa dugsiyada degmada dhexdeeda ah.

U gudbinta heerka dugsiga ku xiga (dhexe ama sare) looma damaanad-qaadayo. Diiwaangelinta heerka fasalka ee xiga, ardeyda deggan meel degmada ka baxsan waa inay soo dalbadaan barnaamijka Diiwaangelinta Furan ama Magnet si loogu oggolaado dugsiga cusub.

Waxaa muhim ah inaad xusuusnaatan in dugsiyo badan oo degmada ku yaala aysan diiwaangelin Karin ardeyda ku nool degmo kale, taas oo ay sabab u tahay goobaha wax lagu barto oo inta ay qaadi karaan ay xadidan tahay.